Ku soo dhowow Laholm

Ku soo dhowow Laholm

Ku soo dhowow Laholm

Guuritaanku waa tallaabo aad u weyn. Ku fekerka oo qura ayaa su'aalo badan ka dhashaan. Sidee ayey noloshaydu ku noqoneysaa meesha cusub? Guritaanku ma wuxuu i siinayaa fursado wanaagsan oo aan nolol wanaagsan ugu noolaado? Ma ka heli doonaa? Ma heli doonaa wax walba oo aan u baahanahay? Ma ka jiri doonaan fursado lagu helo shaqo iyo waxbarasho? Sidee ayey ku noqoneysaa carruurtayda?

Laholm waxa weeye degmo yar oo ku taal koonfurta dalka Iswiidan oo faa'iidooyin badan laga helayo. Waxaa Laholm ka jira fursado wanaagsan oo lagu helayo guryo, shaqo iyo waxbarasho.Waxaa halkaa ku yaal dugsiyo iyo xannaanada carruurta, ganacsi iyo daryeel caafimaad. Laholm waxay u dhowdahay magaalooyin badan oo waaweyn oo xiriir gaadiid oo wanaagsan ayaa ka jira.

Waxana dooneynnaa in Laholm dad badan soo degaan! Waxaan dooneynna inaan kororno oo horumarno! Joogitaankiinu wuxuu hodan ka dhigayaa Laholm idinkoo wata waaya-aragnimadiina iyo aqoomihiina. Waxaan aammisannahay badnaanshaha dadyowga ka geddisan oo waxaan u aragnaa dadka ka yimid dalalka in ay hanti u yihiin degmadayada.

Soo dhowaada!

Per Asklund
Guddoomiyaha Golaha
fulinta degmada

Nils Danred
Ku-simeha madaxa
maamulka degmada

Per Asklund, guddoomiyaha golaha fulinta degmada iyo Nils Danred, ku-simeha madaxa maamulka degmada

Macluumaadka Laholm

Degmada Laholm

Juqraafiga

Degmada Laholm waxay ku taal koonfurta dalka Iswiidan, gobolka Halland ee xeebta galbeed.
Dhinaca galbeedka waxaa ku yaal bad iyo xeeb, bartamahana dhul-beereed, barigana kaymo. Webiga yar ee Lagan wuxuu dhexmaraa degmada, meel walba oo aad deggan tahayna waxaad u dhowdahay dabeecadda iyo biyaha.

Dadka deggan

2009 waxaa Laholm ku noolaa qiyaastii 23 400 oo qof. Boqolkiiba 9 dadka Laholm waxay ku dhasheen dalka dibeddiisa (Dalka oo dhan waxay ahaayeen boqolkiiba 14, 2009).

Degaanada

Degmada Laholm waxay ka kooban 14 degaan. Laholm waxay ku taal bartamaha, waxaana ku nool qiyaastii 6000 oo qof.



Degganaanta

Degganaanta

Degmada Laholm waxaad ka heleysaa degganaansho wanaagsan oo xasilloon. Guryaha la kireysto ee magaalada Laholm waxay inta ka kooban yihiin guryo dabaqyo ah. Degaanada magaalada dibeddeeda ku yaal waxaa laga kireysan karaa guryo gaagaaban oo jardiinadooda leh. Laholm waxaa ka jira qiimo wanaagsan haddii la doonayo in la iibsado guri la yeesho. Sicirta guryaha xeebta ku dhow wuu sarreeyaa, laakiin guri ku yaal meel xeebta xoogaa ka durugsan waxaa lagu helayaa qiimo aad uga hooseeya.

Waxaan doorannay Laholm

Helene & Mouhib Boutros

Helene iyo Mouhib Boutros iyo carruurtooda waxaa sharciga degganaanta la siiyey 2006. Intii uusan qoysku helin gurigooda waxay la soo degganaayeen qaraabo iyo saaxiibbo. Waqtigasna waxay ku guuleysteen la qabsashada nolosha halkaan. Helene waxay aadi jirtay dugsiga barbaarinta iyo in ay carruurta la aaddo dhaqdhaqaaqyada kaniisadda. Waxay bilowday in ay dad halkaas ku barato oo waa ay ku faraxday. Waxay taas dareentay kolkii qoysku soo booqday Stockholm si ay ugu guuraan.

Helene waxay tiri:

– Waxaan aad u aamminsanaa in ay tahay magaalo weyn meeshii aan degi lahaa, laakiin alla maxaan u xiisay xasiloonida Laholm. Kolka aan carruurta bannaanka u la baxo oo magaalada dhexmushaaxayo, qof walba wuu na salaamaa, waxaana laga helaa ammaan iyo xasilooni kolka aad dhexdeggan tahay dadka ku yaqaan. Wax yar ayey Stockholm joogeen oo durbadiiba waxay dib ugu soo noqdeen Laholm.

”Waxaan aad u aamminsanaa in ay tahay magaalo weyn meeshii aan degi lahaa, laakiin alla maxaan u xiisay xasiloonida Laholm. Kolka aan carruurta bannaanka u la baxo oo magaalada dhexmushaaxayo, qof walba wuu na salaamaa, waxaana laga helaa ammaan iyo xasilooni kolka aad dhexdeggan tahay dadka ku yaqaan”

Maanta wuxuu qoysku deggan yahay guri ay leeyihiin oo ku yaal Lilla Tjärby oo ku taal bannaanka Laholm. Helene iyo gabadha ugu weyn waxay baaskiil ku aadaan shaqada iyo dugsiga oo ku yaal Laholm. Gabadha yarina waxay dhigataa dugsi yar oo ku dhow. Kolkii ay Helene soo dhammaysatay waxbarashada cunto-karinta waxay shaqo joogto ah ka heshay jiko ku taal dugsi barbaarin. Mouhib wuxuu ka dhabeeyey wixii uu ku hammin jirey oo ahaa inuu furto meel timajarid, wuxuuna hadda ku dadaalaa in reer Laholm si fiican loogu jaro. Qoysku hadda aad ayuu u qanacsan yahay. Mar walba oo ay booqdaan ehelka iyo qaraabada ku nool Lubnaan, waxay u soo xiisaan gurigooda Laholm, noloshoodii saaxiibada ay halkaan ku leeyihiin.

Shaqo & Waxbarasho

Shaqada iyo waxbarashada

Laholm waxay leedahay dhaqan beeraleynimo oo taariikh dheer. Waxaa weli ku yaal beero laakiin waqtiyadaan dambe waxay noqdeen kuwo shirkado yaryar iyo kuwo dhexe oo dadka degmada badankood u shaqeeyaan. Kaalinta koowaad waxaa ku jira shirkadaha naqshadda iyo farshaxanka, farsamada alwaaxda iyo cunta-soosaarka. Waxaa soo badanaya dalxiiska iyo shirkado badan oo cusub oo ka shaqeeya dalxiiska iyo adeegyada.
Laholm waxaa waqti hore lagu la xiriirsiinayaa suuqa shaqada adigoo fursad u heli kara inaad bilowdo tababar shaqo. Habkaas ayaadna ku baraneysaa af-iswiidhishka iyo dhaqanka goobaha shaqada iswiidhishka.

Talasiin

Xarunta waxbarashada ee Laholm waxaa ku yaal xafiis dadka siiya talooyin ku saabsan sidii aad u dooran lahayd waxbarasho iyo xirfad. Halkaa waxaa jooga lataliye aqoon dheer u leh oo aad kala hadli karto mustaqbalkaaga. Xarunta waxbarashadu waxay kaloo tahay meel lagu kulmo, waana tallaabadii nolosha shaqada iyadoo si firfircoon loo la shaqaynayo Arbetsförmedlingen xafiiska shaqada iyo shirkadaha ganacsiga ee degmada.

Tababar shaqo ee mid ka mid ah dukaamada Laholm

Waxbarashada

Waxbarashooyinka dadka waaweyn badankood waxaa lagu soo ururiyey xarunta waxbarashada. Waxaa halkaan af-iswiidhishka shisheeyaha loo talagalay, waxbarashada asaasiga ah ee dadka waaweyn, waxbarashooyin heer dugsi sare iyo waxbarashooyin xirfadeed.

Af-iswiidhishka

Xarunta waxbarashada waxaad fursad u heli kartaa inaad barato afka iswiidhishka heerarkiisa loogu baahan yahay waxbarashada jaamicadeed:
Iswiidhishka shisheeyaha, heerka A - D.
Iswiidhishka sida luuqad labaad – heer dugsi hoose.
Svenska A iyo Svenska B – heer dusi.

Fursadaha kale oo waxbarashada horseedi kara

U dhowaanshaha kulliyadda Halmstad iyo magaalooyinka kale waxaa laga helayaa fursado lagu barto qaybaha waxbarashooyinka badankood.

Waxaan doorannay Laholm

Jasmin Hashem

Jasmin waxay ka timid Ciraaq waxayna Laholm ugu guurtay kaalmo ay ka heshay Hay'adda socdaalka. Jasmin waxay sheegeysaa inay ku qanacsan tahay caawimaadda ay ka heshay degmada ilaa markii ay u soo guurtay Laholm. Waa ay fududay in la la xiriiro mas'uuliyiinta, waxayna dareemeysaa in lagu soo dhoweeyey in ay ula timaaddo wixii su'aalo ah. "Waana i barteen oo waa wax lagu farxo", ayey tiri Jasmin.

Arrin kale oo Jasmin u aragto muhiim, si wanaagsanna uga shaqayneysa bartamaha Laholm waxa weeye isgaarsiinta gaadiidka. Tusaale ahaan, aad ayey fududahay in laga isaga safro Laholm iyo Ängelholm, halkaas oo Jasmin ku barato 2 sano oo waxbarasho xirfadeed ah. "Waxaa hadda muhiim ah inaan waxbarashada dhammaysto, kadibna shaqo raadsado. Laga yaabo inaan furto xafiis xisaabaad kolka aan dhammaysto waxbarashada. Hadda waxay u muuqataa in wax waliba suurtagal yihiin", ayey sheegeysaa Jasmin.

"Waxaa hadda muhiim ah inaan waxbarashada dhammaysto, kadibna shaqo raadsado. Laga yaabo inaan furto xafiis xisaabaad kolka aan dhammaysto waxbarashada. Hadda waxay u muuqataa in wax waliba suurtagal yihiin"

Carruurta & Dhallinyarada

Carruurta & Dhallinyarada

Laholm waa degmo carruurta u wanaagsan. Dugsiyada barbaarinta iyo dugsiyada kaleba waa u dhow yihiin dadka. Kama jiraan gaadiid buuq keenaya. Ardaydu waxay baaskiil u qaataan ama u lugeeyaan dugsiyada. Waxaa kaloo ka jiraa dhaqdhaqaaqyo badan oo loogu talagalay carruurta, dhallinyarada iyo dadka waaweyn. Nolosha magaaladaan yari waxay faa'iidooyin badan u tahay carruurta iyo dhallinyarada.

Dugsiyada

- waxay dhammaan carruurta degmadu boos ka helaan dugsiyada barbaarinta. Waxaa kaloo jira dugsiyo xannaano oo carruurta aad la tegi karto kolka aad fasaxa waalidka ku jirto
- dugsiyada hoose (fasalada F-6) ayaa waxay ka jiraan degaanada degmada badankood
- dugsiyada dhexe (fasalada 7-9) waxay ku yaalliin Laholm, Veinge iyo Våxtorp
- dugsiga sare ee Osbecksgymnasiet wuxuu ku yaaö Laholm
- dugsiyada sare kadib waxaa jira fursado lagu baran karo waxbarashada dadka waaweyn ee Laholm ama Kulliyadda (Högskolan) Halmstad

Waqtiyada fasaxa

- ururada qabanqaabiya kubbadda cagta, innebandy, heesaha, kubbadda gacanta, dabaasha, teeniska, dugsiyada farda-fuulka, kalluun-dabasho, scouter iyo waxyaalo kaloo badan
- xarumaha waqtiyada fasaxa oo meelo badan ku yaal ayey dhallinyaradu ku la kulmaan saaxiibadood oo ku sameeyaan dhaqdhaqaaqyo xiiso leh.
- u dhowaanshaha dabeecaddu waxay suurtagelisaa in sannadka oo dhan daawashooyin xusuus reeba
- waxaa halkaa ku yaal bad iyo harooyin lagu dabaasho xilliga kuleylaha. Haddii xilliga jilaalkuna aad u qabow yahay, waxaad adigoo qaba kabaha barafka ku dul ordi kartaa harooyinka ama ulaha barafka ayaad ku wadan kartaa degaandegyada Hallandsåsen

Warbixin dheeraad ah oo ku saabsan dhaqdhaqaaqyada kala geddisan ka akhriso boggaan www.laholm.se, kommunal service, idrott & fritid

Waxaan doorannay Laholm

Lama & Sharaf Massad

Lama iyo Sharaf waxay Laholm uga soo guureen Malmö. Malmö waxaa ku adkayd in ay helaan goob tababar shaqo, waxaa kaloo jiray waxyaalo kale oo uusan qoysku ku faraxsanayn. Tallaabo weyn ayey ahayd in laga soo guuro Malmö oo loo soo guuro magaalo u yar sida Laholm. Lama iyo Sharaf laba goor ayey booqasho ku yimaadeen Laholm intii aysan go'aan gaarin.

Guuritaanku wuxuu aad ugu fiicnaa wiilkooda, Rushd oo 8 sano jira. Waa xaqiiqa inuu u xiisay saaxiibadiisa Malmö jooga, haddana wuxuu u arkaa in nolosha Laholm mid aad u sarraysa. Wuxuu dhigtaa fasalka 2:aad ee dugsi ku yaal meel u dhow guriga reerka. Dugsiga kadib wuxuu cayaaraa kubbadda cagta oo uu tababar la sameeyo mid ka mid ah naadiyada badan ee degmada. Haddii kale wuxuu aadaa goobta dabaasha ee Folkhälsocentrum, halkaas oo uu tababar la qaato naadiga dabaasha ee Stimmet. Gabadhooda Linn waxay aad ugu faraxsan tahay dugsiga barbaarinta.

"Wiilkayagu wuxuu dugsiga ku tagaa baaskiil maalin walba, wuxuuna tagaa oo ku wareegaa Laholm annagoo aan ka welwelsanayn oo waxba ka cabsanayn"

Bishii ugu horreysay ee Laholm waa ay adkayd, ayey Lama tiri, oo u xiisooday in ay ku noqdaan Malmö. Laakiin hadda waxaa jira waxyaalo badan oo reerku u doonayo inuu joogo Laholm.

Halkaan waa meel deggan oo aan ammaan ku haysano. Wiilkayagu wuxuu dugsiga ku tagaa baaskiil maalin walba, wuxuuna tagaa oo ku wareegaa Laholm annagoo aan ka welwelsanayn oo waxba ka cabsanayn, ayey tiri Lama. Xiriirada degmadu waa mid aad u wanaagsan. Laholm waa magaalo aad uga yar Malmö oo sidaas awgeed waxaa ka jira fursado xiriir dhowgi ku dhexmaro xoghayaha arrimaha bulshada iyo qoyska. Halkaan wuxuu qof waliba muujiyey inuu danaynayo qoyska, ayey tiri Lama.

Adeegyada

Adeegyada

Waxyaalo badan ayey Laholm ku deeqaysaa oo waa dhowdahay u safridda iyo ka safridda degamdu. Waxaad waddada baarbuurta iyo tareenada ku gaari kartaa Copenhagen, Malmö iyo Göteborg labo saac gudahood. Haddii aad dooneyso inaad degmadaan joogto, wax walba oo aad u baahan tahay waad ka heleysaa.

Gaadiidka

– bas ayaad ku tegi kartaa dhammaan degaanada degmada ka tirsan iyo Halmstad. Safarka Halmstad wuxuu qaataa qiyaastii 30 daqiiqo
– tareen ayaad u raaci kartaa Göteborg ama Malmö. Safarka Malmö ama Göteborg wuxuu qaataa qiyaastii hal saac iyo bar
– waxaad dhaqso ugu safri kartaa waddada baabuurta E6 oo aada dhanka waqooyi (Göteborg) iyo dhanka koonfureed (Malmö/Köpenhamn)

Dukaamada

– dukaamo waaweyn iyo kuwo yaryar iyo dukaamo gaar ah oo aad ka heli karto cuntooyinka bariga
– dukaamo badan oo iibiya dharka, alaabta carruurtu ku cayaarto, qalabka elektaroniga iyo alaabta dhismaha
– suuqa ganacsiga ee Mellbystrand waxaa ku yaal dukaamada ee dharka badankood
– dukaamada barxadaha miyiga waxaa lagu iibiyaa cuntooyin dad sameeyey
– dukaamo gacan-labaad

Daryeelka caafimaadka

– Rugaha daryeelka caafimaadka, halkaas oo aad ugu horrayn la xiriireyso kolka aad daryeel caafimaad u baahan tahay
– Rugaha daryeelka caafimaadka carruurta oo la socda caafimaadka iyo koritaanka carruurtaada
– waxaa u dhowdahay qaybta daryeelka gaarka ah iyo qaybta dhalmada oo ku yaal isbitaalka gobolka ee Halmstad

”Suuqa quruxda badan ee Laholm waxaa sannad walba laga qabanqaabiyaa dhaqdhaqaaqyo kala duwan oo ay ka mid yihiin xafladaha magaalada, dhaqdhaqaaqyada galbihii ee xilliga kuleylaha, suuq habkii waqtiyadii hore iyo waxyaalo kaloo badan. Waxaa kaloo jira fagaare ganacsi oo maalin walba furan oo lagu iibiyo kalluun, ubaxyo iyo dhar”

Bartamaha Laholm

Xarunta isdhexgalka dadyowga

Integrationscentrum [Xarunta isdhexgalka bulshada]

Integrationscentrum ee degmada Laholm waxay caawimaad iyo taageero siisaa dadka inta ay degmada ku cusub yihiin. Caawimaadda waxaa la siiyaa qaxootiga dhowaan yimid oo haysta sharciga degganaanta, oo degan degamada.

Kolka aad dhowaan soo gasho waxaa jira waxyaalo badaan oo muhiim ah oo loo baahan yahay inay shaqeeyaan. Waxaad u baahnaan kartaa talasiin iyo warbixino ku saabsan bulshada, si aad u ogaato meelihii aad la xiriiri lahayd oo waxaad dooneyso weyddiin lahayd, iyo inaad ogaato xuquuqdaada iyo waajibaadka ku saaran. Shaqaalahayaga Integrationscentrum waxaan u shaqaynaa hab aad fahmi karto oo aad ku xallin karto xaaladaha noloshaada, si waqtiga ugu horreeya aad degmada soo degtay uu u noqdo mid micna leh oo aasaas u noqda nolol cusub oo aad ku noolaato Laholm.

Ku soo dhowow mar walba inaad naga la soo xiriirto Integrationscentrum. Waxaad naga heleysaa Lärcentrum, Lantmannagatan 3 ee Laholm. Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan u soo guuritaanka Laholm, weyddiiso xogahayahaaga Migrationsverket ama kan degmada aad deggan tahay inuu la soo xiriiro isuduwaha arrimaha isdhexgalka Anna Haraldsson.

Warbixinta xiriirada

Anna Haraldsson
isuduwaha arrimaha isdhexgalka
taleefan: 0430-265 10, mobiil: 076-7635300
faks: 0430-265 13
e-mail: anna.haraldsson@laholm.se

Jenny Strand,
gacanhaaye arrimaha isdhexgalka
taleefan: 0430-265 24
faks: 0430-265 13
e-mail: jenny.strand@laholm.se

Milad Karam,
hawlwadene arrimaha isdhexgalka
taleefan: 0430-265 16, mobiil: 070-689 02 22
faks: 0430-265 13
e-mail: milad.karam@laholm.se

Arbetsförmedlingen

Arbetsförmedlingen – waa goobta fursadaha ay ku kulmaan

Arbetsförmedlingen waa goobta dalka Iswiidan ugu wayn oo shaqooyinka laga helo. Xilka anaga na saaran wuxuu yahay in an hab firfircoon oo suurtagal ah isku keenno shaqo-raadsadeyaasha iyo shirkadaha shaqada bixiya. Anaga waxaa nalaga helaa meelaha shaqooyinka laga helo oo ku yaalaan dalka oo idil. Dhammaan adeegyadeeda waa lacag la'aan.

Haddii aanu nahay hawlwadeneyada *Arbetsförmedlingen* waxaan aqoon dheer u leenahay suuqa shaqada oo dalka oo idil oo ah heer degmo iyo goboleed ba. Waxaanu leenahay keydka kombyuutarka ee shaqada laga raadsado ee dalka Iswiidan ugu wayn. Haddii an durbadiiba kula kulanno, waxaanu heleyna fursad an ku shaacbixinno khibradahaaga, aqoontaada iyo nooca xirfadaha aad xiiseeyso taasoo noo suurtagelinayso in an shaqo kaaga helno degmooyinka iyo shirkadaha u baahan dadyoowga leh xirfadaada oo kale.

Arbetsförmedlingen ku yaallo degmada Laholm wuxuu xiriir wanaagsan la leeyahay shirkadaha iyo shaqobixiyeha, taasoo suurtagelinayso helida wada kulan iyo shaqo ku qorid. Teeda kale, shaqo-raadsadehu wuxuu shaqo-bixiyeha ka heli karaa boos tababbar shaqo, kaasoo isaga uu suurtagelinayso helida muqaalka xirfadaha kala duwan iyo goobaha laga shaqaysto ee kala duwan. Fursadhaan oo idil waxay adiga oo ah qof dalka ku cusub, ku siinayaan sida khibradaha shaqada ee aad dalkaaga kala timid ula qabsiin lahayd suuqa shaqada ee dalka Iswiidan. Waxaad kaloo helaysaa saldhigga go'aanka nooca xirfadda aad baran lahayd. Warbixin badan ayaa bogga Internetka ka akhrisan kartaa *www.arbetsformedlingen.se*

Ku soo-dhowaada
Arbetsförmedlingen degmada Laholm!

Folkhälsocentrums badland
[Xarunta arrimaha caafimaadka ee ummadda]

Mellbystrand
[Waa goob xeeb ah]

Laxfiske vid Lagan
[Waa goob laga kaluumaysto]

Stadsfesten i Laholm
[Waa goob xafladaha lagu dhigo]

Fotbollsmatch på Glänningepark
[Waa goob kubbada cagta lagu ciyaaro]